


# FARXAD BULSHADA WADA GAADHA

ARC OO TOBANNAAN KUN OO QOYS  
GAADHSIINAYSA ODXADA IYO DHARKA CIIDDA





Gobalka Geeska Afrika waxaa ka jira dhibaatooyin nololeed oo dhinac kasta ah, waxaa ka mid ah cunto yaraan ay tiro koobyadii u dambeeyey ee Qaramada Midooobey qoyaasayaan in ay saamaysay dad ka badan 4.3.

Xilligan oo ay soo dhowdahay Ciidda weyn ee Al-Adxa ayaa hay'adda Gargaarka Afrika (ARC), iyada oo kaashanaysa hay'ado kale, shakhsiyad samalayaal ah iyo dhinacyo kala duwan oo ah deeq bixiyeyaa gobalka iyo caalamkaba ka socda, waxa ay ku dhawaaqday bilowga ololaha qaybinta hilbaha Odxada ee sannadka 2024 (Ku beegan 1445 Hijriya). Si ay farxadda maalintaasi u noqoto mid bulshada wada gaadha, intii suurtagal ahna loo yareeyo bulshada ay cunto la'aantu ka kala dhantaali karto, damaashaadka maalintan weyn.

Mashruuca qaybinta hilbka Odxada waa fursad lagu dhiirrigeliyo in bulshada ladani ay ka qaybgasho hawlaha samafalka, isla markaana lagu xoojinayo qiyamka iskaashiga iyo iskaalmaynta ee bulshada dhexdeeda.

Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, maamulaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika oo faahfaahin ka bixinayey ololahan, waxa uu sheegay in yoolku uu yahay in la gaadho in ka badan 100 kun oo qoys oo sabool ama barakacayaal ah.

Waxa uu maamuluhu sheegay in mashruuca odxada uu ku lammaanyahay mashruuc lagu magacaabo 'Ciidsii ubadka' oo dharka Ciideed la siinayo carruurta agoonta ah ama ka soo jeeda qoysaska ay hayntoodu yartahay.

Mashruuca Odxadu muhiimad gaar ah ayaa uu u leeyahay hay'adda ARC, maadaama oo uu ka mid yahay mashaariicda ugu waaweyn ee ay hay'addu sannad kasta fuliso. Maamulaha guud ee ARC oo faahfaahin ka bixinayey ayaa sheegay in himilada hay'addu ay tahay in la sii ballaadhiyo mashruucan si loo gaadho tirada ugu badan ee suurtagalka ah ee qoysaska danyarta ah ama dhibaatooyinka kale ee nololeed ay ku dhaceen, sida barakacayaasha. Gaar ahaan xilligan oo gobalka Geeska Afrika ay ka jiraan duruufadag oo dhaqaale.

"Waxa aan ugu baaqayaa hay'adaha samafalka, ganacsatada iyo shakhsiyadka samafalayaasha ahba, in ay ka qaybgalaan kaalmaynta mashruucan hilbka Odxada iyo dharka Ciidda lagu gaadhsiinayo bulshada saboolka ah" ayaa ka mid ahayd hadalka mudane Dr. Mucallimi. Isaga oo baaqiisaa ku ladhay codsi uu dadka ladan iyo guud ahaanba deeqbixiyeyasha kaga dalbanayo in ay u dhego nuglaadaan gacan ka geysashada kaalmada lagula tacaalayo baahiyaha bani'aadamnimo ee Geeska Afrika ka jira.

# SICIRKA UDXIYADA



## Lax

Faa'idayste	Qoysaska Ka faaiday	Kg	Sicirka \$
24	4	22-18	80



## Adhi

Faa'idayste	Qoysaska Ka faaiday	Kg	Sicirka \$
24	4	20-18	80



## Geel

Faa'idayste	Qoysaska Ka faaiday	Kg	Sicirka \$
210	35	180 220	640



## Sac

Faa'idayste	Qoysaska Ka faaiday	Kg	Sicirka \$
150	25	150 200	480





06



MASHAARIICDA  
DHISMAHA

07



MASHAARIICDA  
BIYAHAYO IYO  
FAYADHOWRKA

08



AQOON & OGAAL

10



MASHAARIICDA  
ARRIMAHABULSHADA



A.R.C

Address: Barbera Road - Hargeisa  
Mobile: +252633278256  
Phone: +252514333  
E-Mail:  
Website: [www.arcso.org](http://www.arcso.org)

مساراً ت  
خيريَّة

CHARITABLE PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO  
HAYADDA GARGAARKA AFRICA  
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO  
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED  
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (32) APRIL 2024





## MAAMULAHU GUUD OO KORMEERAY MASHAARIICDA AY ARC KA WADDO



Maamulaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa u kuurgalay habbsami u socodka shaqo ee xarunta ARC Muqdisho, iyo mashaariicda ay hay'addu ka waddo magaaladaas.

Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi oo booqasho shaqo ku tegey caasimadda Soomaaliya, waxa kale oo uu fursaddan uga faa'idaystay xoojinta iskaashiga iyo wada shaqaynta ARC iyo hay'adaha iyo dhinacyada kala duwan ee ay shaqo wadaagta yihiiin.

Waxaa booqashada ku wehelinayey mudane Muxamed Cabdalwahaab, madaxa Barnaamijka waxbarashada ee ARC, waxa aanay qayb ka tahay hawlaho joogtada ah ee maamulaha iyo madaxda kale ee Barnaamijyada iyo mashaariicda ay ku tagaan xafiisyada, iyo goobaha shaqo ee ay ARC mashaariicda ka waddo, guud ahaan dhulka Soomaalida ee gobalka

Geeska Afrika.

Waftiga maamulaha waxaa magaalada Muqdisho ku soo dhoweeyey, Dr. Maxamed Cali Geelle, maamulaha xafiiska ARC ee Muqdisho, waxa aanu warbixin waifi ah ka siiyey hawlaho shaqo ee socda, qorshayaasha hawleed ee xafiiska u dejisan, caqabadaha jira, fursadaha ay tahay in laga faa'iideeyo ee ka jira deegaannada uu xafiiskiisa Muqdisho maamulo, Waftiga maamuluhu waxa kale oo ay kulammo la qaateen madax-xafiiseedyada iyo halwadeennada kale ee Muqdisho, kuwaas oo ay ka dhegeysteen warbixinno la xidhiidha hawlahooda shaqo. Iyaga oo dhinacoodana siiyey xogta, Tilmaamaha iyo taloooyinka muhiimka u ah hawlaho shaqo ee socda. Kulana dardaarmay muhiimadda ay leedahay in si hufan oo daahfuran loo guto waajibaadka shaqo.



## MASHAARIICDA DHISMAHA



## HAWSHA DHAMMAYSTIRKA XARUNTA AMAL EE BOORAMA OO MEEL

### FIICAN Maraysa



Waxaa weli si firfircoон u socota hawsha dhammaystirka dhismaha, xarunta caafimaadka ee AMAL oo ka socda Boorama. Waa Mashruuc ay dedejintiisu muhiim tahay, marka la eego baahida daran ee bulshadu ay u qabto adeegyo caafimaad oo casri ah.

Magaalada Boorama ee xarunta gobalka Awdal, waxa ay ka mid tahay deegaannada ay ARC muddada dheer ka wadday, adeegyada caafimaad iyo mashaariic kale oo waxbarasho iyo guud ahaan arrimaha

samafalka la xidhiidha.

Mashruucan waxaa caawinaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa aanu qayb ka yahay barnaamijka samafalka caafimaadka ee ARC oo ka socda deegaanno kala duwan oo Geeska Afrika ah.

ARC waxa ay hore xarumo caafimaad iyo cisbitaallo uga dhistay, kana shaqaysiisaa deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.



## MASHAARIICDA BIYAH IYO FAYADHOWRKA



### ARC OO HIRGELISAY CEELBIYOOD KU FILAN 500 QOYS

Baydhabo, Soomaaliya – ARC waxa ay xadhiga ka jartay ceelbiyood jooggiisu dhan yahay 70 mitir oo ay ka hirgelisay deegaanka magaalada Baydhabo ee Soomaaliya. Ceelkan oo loodhammaystiray kaabayaasha ay ka mid yihiin qalabka biyaha ka soo tuuraya oo koronta ku shaqaynaya, qaybta korontada qorraxda ka dhalinaysa (Soolar), qasabadaha ay dadku ka dhaansanayaan iyo o darka ay xooluhu ka cabbayaan.

Ceelkani oo filan baahida biyood ee in ka badan 500 oo qoys, waxaa maalgelintiisa naga caawisay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.

Waxa aanu qayb ka yahay Barnaamijka biyaha ee ARC oo ujeedaddiisu tahay in dadka saboolka ah ee Deggen dhulka oomanaha ah laga caawiyo, helitaanka biyaha. Gaar ahaan xilliayda abaaraha.





## Mac-hadka Taababarrada ee ARC oo macallimiinta siiyey Tababar kobcinta xirfadda Hab-qoraalka

Mac-hadka Tababarrada iyo diyaarinta ee Kuweytiga ayaa soo gebagebeeyey tababar, muddo saddex bilood ah u waday macallimiin ka socda jaamacadda Al-bayaan ee magaalada Hargeysa iyo xarunta waxbarashada Kuweytiga.

Tababarkan oo ay bixinayeen barayaal ku xeeldher koorasooinka ay bixinayeen, waa uu ku aaddan macalinnimada iyo xirfadda hab-qoraalka wanaagsan ee afafka Ingiriisiga iyo Carabiga, waxaana ka faa'iidaystay lixdan macallin oo 10 ka mid ahi ka socdeen jaamacadda Albayaan, kuwaas oo isugu jiray 26 ah barayaasha af Carabiga iyo 34 Ingiriisiga dhiga.

Markii ay koorsadani dhammaatay, waxaa tababartayaasha lagu sameeyey sahamin iyo qiimayn lagu eegayey heerka ka faa'iidaysigooda tababarka iyo miisaanka casharrada ay ka korodhsadeen.

Dr. Mudahar Xuseen, ku xigeenka maamulaha guud ee ARC oo ka qaybgalay munaasabad lagu soo xidhayey tababarkan, ayaa hadal uu madasha ka jeediyeey waxa uu bogaadiyeey tababarkan iyo hannaankii quruxda badnaa ee uu u soo dhammaystirmay. Wuxuu aanaa rajeeyey in uu noqdo mid waxtar iyo faa'iido ku kordhiyey xirfaddii waxbariseed ee tababartayaasha. Isaga oo kula dardaarmay dhaqangelinta waxa ay barteen, iyo in ay aqoontaas la sii wadaagaan barayaasha kale ee ay shaqo wadaagta yihiin. Si uu nidaamka waxbarasho ee goobaha ay ka yimaaddeen iyo guud ahaan dalkuba u noqdaan midho dhal, una rumeyyaan yoolashooda.

Mudane Muxamed Cabdalwahaab, madaxa Barnaamijka waxbarashada ee hay'adda




gargaarka Afrika (ARC), ayaa isaguna tababartayaasha ku baraarujiyey muhiimadda weyn ee ay leeyihiin tababarrada kobcinta xirfadda macalinnimada, iyo sida ay u kobciso waayo-aragnimadooda.

Halka uu mudane Axmed Cabdalxamiid, masuulka xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa, uu isaguna sheegay in tababarrada noocan ahi xoojiyaan kartida macallinka, iyo awooddada ay u leeyihiin Maaraynta caqabadaha ka hor yimaadda fasalka dhexdiisa.

Ugu dambayn waxaa munaasabadda hadal kooban ka jeediyeey mudane Xasan Muuse, maamulaha dugsiga sare ee Kuweytiga, qaybta wiilasha. Wuxaana hadalladiisa ka mid ahaa, "Waxaa hubaal ah in tababarkani uu yeelan doono raad togan oo fasallada laga dhextarko, waxa uu macallimiintan ka caawin doonaa dadaalkooda ay kor ugu qaadayaan heerka waxbarasho ee ardaydooda" isaga oo dhinaca kalana hoosta ka xariiqay in tababarkani uu macallinka u leeyahay faa'iidooyin dhinacyo badan leh oo ay ka mid tahay, in uu korinayo awooddoda dhinaca afafka.

Gunaanadkii munaasabaddan waxaa tababartayaasha la guddoonsiyyey shahaadooyinka ka marag kacaya tababarkan



## ARC Oo Tababarro Kala Duwan Siisay Halwadeenanda Xafiiska Muqdisho



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa halwadeennadeeda kala duwan ee xafiiska Muqdisho iyo Goballada Koonfurta ka ah waxa ay siisay tababarro kor loogu qaadayo tayo-wanaagga maamulka, laguna kobcinayo xirfadda shaqaalaha.

Barnaamijkan oo qayb ka ah dadaallada ay ARC doonayso in ay kor ugu qaaddo kartida iyo aqoontooda, waxaa ka mid ahaa tababarro iyo aqoon-korodsiyo, sida diyaarinta miisaaniaydda shaqada, iyo hannaanka ugu hufan ee si daahfuran loogu adeegsan

karo, iyo dejinta qorshe hawleedyada iyo diyaarinta warbixinaha shaqo. Sida oo kale Mudane Muxamed Cabdalwahaab, madaxa Barnaamijyada waxbarashada ee ARC ayaa shaqaalaha mashaariicda waxbarashada ee xafiiska Muqdisho siiyey tababar la xidhiidha kobcinta tayada iyo qiyamka fiican ee waxbarashada. Dhinaca kalana waxaa hawladeenanda xafiiska Muqdisho lagu tababaray halbeegyada tayo-wanaagga maamulka iyo qiyamka shaqo ee caalamiga ah.



## MASHAARIICDA ARRIMAHAD BULSHADA



## ARC Oo Qoysas Danyar Ah U Abuuray Ganacsiyo Yaryar



ARC ayaa qoysas danyar ah oo ku nool Boorama iyo Laascaanood u furtay gacansiyoy yaryar. Saddex qoys oo laba ka mid ahi ku dhaqan yihiin Laascaanood, midka kalana Boorama ayaa la siiyey buudhiyo kaariyoone ah oo u diyaarsan dukaan ahaan, iyo badeecadihi raasamaalka u noqonayey meheradda cusub ee lagu iibinayey.

Mashruucan ayaa qayb ka ah Barnaamijka 'Xoogsi Xalaal ah' oo ARC ay qoysaska danyarta ah ugu samayo meherado ganacsi ama xirfado iyo farsamada gacanta oo ay ku xoogsadaan, si ay ugu noqoto il

dakhli oo ay noloshooda ka kaabaan.

Barnaamijka Xoogsi xalaal ah waxaa sannad kasta ka faa'idaysta boqolaal dhalinyaro ah oo kaalin waxsoosaar ugu jira qoysaskooda. Wuxuu aanay ujeedadiisu tahay in la yareeyo baahida kaalmada dibadeed, lana dhiirrigeliyo koboca dhaqaale ee bulshada.

Barnaamijka Xoogsi xalaal ah oo ay ARC ka fuliso guud ahaan dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.



## Haween Loogu Deeqay Tababarka Dhar-tolidda Iyo Makiinado Dawaar



Machadka farsamada gacanta iyo xirfadaha ee Kuweytiga ayaa tababar xirfadda tolmaha dharka ah siiyey, toban ka mid ah haweenka magaalada Boorama ee gobalka Awdal. Barayaal ku xeeldheer nashqadda, jarjaridda iyo tolmaha dharka ayaa hablahan baray noocyada kala duwan ee xirfadda. Markay ay dhammaysteenna waxaa la guudoonsiiyey Makiinadaha tolmaha oo loogu talagalay in ay ku shaqtagaan.

Machadyada farsamada gacanta iyo xirfaduhu waxa ay ka mid yihiin, mashaariicda ay hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ka fuliso Somaliland, waxa aanay

xarumo si fiican u qalabaysan, barayaal takhasus ahina joogaan ku leedahay magaalooinka Hargeysa, Boorama iyo Burco Somaliland. Kuwaas oo ay sannad kasta ka faa'iidaystaan boqolaal ka mid ah dhalinyaradu.

Ujeedada barnaamijkan ayaa ah in dhalinyarada la baro xirfado looga baahan yahay suuqa shaqada, si ay fursad ugu helaan in ay abuuraan ilo dakhli oo ay noloshooda ka maareeyaan. Isla markaana loo yareeyo baahida ay dadku u qabaan ku tiirsanaanta kaalmada dibadda. Barnaamijkan waxaa maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt.

### ARC ayaa Qoys danyar ah xoolayn u samaysay



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa laba neef lo' ah oo irmaan, mid kastaana lammaan yahay ugu deeqday qoysas danyar ah oo ku dhaqan duleedka magaalooinka Jigjiga, dawlad-deegaanka Soomaalida iyo Muqdisho Soomaaliya. Xoolahan dhaqashada ah ayaa loogu talagalay in qoysaskan oo danyar xooluhu ka baxeen ahi ay ka faa'iidaystaan caanaha, subagga, iyo taranta.

Mashruuca xoolaynta qoysaska danyarta ah, waxa uu qayb ka yahay barnaamijka Xoogsi xalaal ah oo sannad kasta ay ka faa'iidaystaan boqolaal qoys oo danyar ahi. Waxa aanay ujeedadiisu tahay in qoysaska loo sameeyo il dakhli iyo dhaqaale abuur, si loo yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda, loona dhiirrigeliyo xoogsiga iyo waxsoosaarka bulshada.



@africanreliefco



**Address:** Barbera Road - Hargisa

**Mobile:** +252633278256

**Phone:** +252514333

**E-Mail:** somalia office1@gmail.com

**Website:** www.arcso.org

